



### Waa maxay HealthInfoNet?

- HealthInfoNet waa nidaam ammaana oo koombuyuutarka ah waxaana isticmaala dhakhtarada, cusbitaalada iyo bixiyayaasha daryeelka caafimaadka in ay la wadaagaan macluumaadka si lagu siiyo daryeel ammaan badan kana wanaagsan.
- Nidaamkani wuxuu isku keenayaa macluumaadka caafimaad oo dhan kana dhigayaa hal kayd caafimaad oo elektarooniga.
- Bixiyayaasha daryeelka caafimaadku waxay hadaba wadaagaan kaydka caafimaad iyagoo isku diraya fakis, iimayl, iyo boostaba. HealthInfoNet waxay ka dhigaysaa mid ka fudud, ka dhakhsa badan, kana ammaan badan.

### Waa maxay kaydkaaga HealthInfoNet?

- Waxaa ku jira kaydkaaga HealthInfoNet macluumaad ku saabsan caafimaadka sida dawooyinkaaga, xasaasiyadaada, natiijoyinka badhitaanada, raajada, iyo warbixino.
- Waxaa ku jira magacaaga, taariikhda dhalashada, cinwaanka, jinsiga, iyo telefoonkaaga nambarkiisa. Waxaa sidoo kale ku jiri kara nambarka caymiska bulshada, kaas oo aan la wadaagin.
- Caafimaadka maskaxda iyo macluumaadka HIV/AIDS waxaa kaliya oo la wadaagi karaa marka aad tidhaahdo adigu OK amma haddii ay kugu dhacdo xaalad caafimaad oo dagdag ah.

### Waa maxay faa'iidooyinka haysashada kaydka HealthInfoNet?

- HealthInfoNet waxay ka caawinaysaa bixiyayaasha caafimaadkaaga in ay si wada jir ah u shaqeeyaan si ay u sameeyaan go'aano laga fiirsaday oo khuseeya daryeelkaaga, gaar ahaan xaalada degdega ah.
- Faa'iidooyinka kale waxaa ku jira, qaladaad yar, baadhitaano yar oo soo noqda, shaqo waraaqeed ka yar, qiimo jaban, iyo daryeel tayo wanaagsan leh.
- Si aad wax badan u sii ogaato, booqo [www.hinfonet.org](http://www.hinfonet.org) ama wac 1-866-592-4352.

### Ma yihiin kaydkaagu mid ii gaar ah ammaana ah?

- HealthInfoNet waxay qaadaysaa talaabo kasta oo ay ku illaalinayso kaydkaaga gaar ahaanshihiisa iyo ammaankiisaba.
- Macluumaadka waa la qariyey elektaroonig ahaan dabadeed waxaa loo diray xidhiidho koombuyuutar oo ammaana.
- Macluumaadka adiga ku tilmaamaya lama iibin doono lagumana dari doono liis kasta oo boosto lagu dirayo.
- Kaliya kuwa ku lug leh daryeelka caafimaadkaaga ayuun baa eegi kara kaydkaaga. Si aad u codsato warbixin ku saabsan qofka eegay kaydkaaga iyo goortii uu eegayba, booqo [www.hinfonet.org/audit](http://www.hinfonet.org/audit) or call 866-592-4352.
- Dabcan, ma jiro hab elektaroonigaa oo dhammaantii ammaan ahi. Haddii aad aad dareento in khatartu ka culustay faa'iidada, waxaa laga yaabaa in aad iska-dayso.

### Ka waran haddi aanan rabin kaydka HealthInfoNet?


- Haddii aanad rabin kaydka HealthInfoNet waad iska joojin kartaa dabadeed waxaad go'aansan kartaa in aanad la wadaagin macluumaadka caafimaadkaga adigoo adeegsanaya HealthInfoNet. Haddii aad iska-joojisid, HealthInfoNet waxay ka saari macluumaadka caafimaadkaaga nidaamka dabadeed waxay soo reebi uun magacaaga, cinwaankaaga, iyo taariikhda dhalashada si ay u xaqiijiso in aan loo gaynin wax macluumaad caafimaad ah. Si aad iskaga joojiso, waxaad waydiisa bixiyaha daryeelkaaga caafimaad foomka iska -joojinta. Waxaad sidoo kale ka dhammaystiri kartaa foomka onlayn ahaan cinwaanka [www.hinfonet.org/optout](http://www.hinfonet.org/optout) amma wac 1-866-592-4352.
- Haddii aad go'aansatid mar danbe inaad rabto kaydkaaga HealthInfoNet, waxaa kaliya ee aad u baahan tahay si aad u qabataahi waa in aad buuxiso foomka doorashada. kaydkaaga HealthInfoNet waxaa kaliya ee ku jiri doona boqashooyinkaaga caafimaad kuwaas oo dhacay ka dib markaad dooratay. Si aad u dooratid, Booqo [www.hinfonet.org/opt-in](http://www.hinfonet.org/opt-in) amma wac 1-866-592-4352.

### Kaadi haysta oo lagaa saaray 2 sano ka hor.

*In aad aragto dhakhtar ku takhasusay wadnaba marka aad aragto garaac wadne oo aan caadi ahayn.*

### Xasaasiyad : xasaasi ku ah benasaliinta

*Waxaa uu dhaktarka goysku ku sheegay in uu leeyahay dufan aad u sareeya.*



**Uu qaato dawooyin steroid-ka maalin kasta, cudurka xubno xanuunka. daraadeed.**

**Waxay caawinaysaa daryeel bixiyayaasha Ali ay u arkaan dhamaan macluumaadkiisa caafimaad oo ku jira meel ammaana oo elektarooniga.**